



Macallinka ka tirsan Wilson oo kaalinta kama dambeysta ah u soo baxay abaalmarinta Macallinka Sanadka

Macallimiin ka socota labo dugsi oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa loo xushay Dhanka Shaqa Wanaaga OnPoint Community Credit Union Circle of Excellence, iyada oo mid ka mid ah, Macallinka ka socda Wilson ee Joe Minato, loo magacaabay kaalinta kama dambeysta ah ee ururka ee Abaalmarinta Macallinka Sanadka.

Minato, oo dhiga AP Physics I iyo Science Research, ayaa waxaa ku soo biiray Macallinka ka socda Franklin ee dhiga Metalworking iyo Manufacturing ee Myron Ryan oo loo magacaabay Dhanka Shaqa Wanaaga. Sharaftaasi ay heleen waxaa la socotay abaalmarin lacageed oo dhan \$1,500 iyo deeq lacageed oo dhan \$1,000 oo la siinayo mid kasta oo ka mid ah 10 dugsi ee la soo xushay.

Minato wuxuu ahaa mid ka mid ah labaddii u soo baxay kaalinta kama dambeysta ah ee maamuuska Macallinka Sanadka ee fasallada 9-12. Qofka guuleystay, oo uu weheliyo qofka ku guuleytay dhanka macallimiinta K-8, waxaa lagu dhawaaqi doonaa Talaadada, Maajo 21. Labada qof ee ku guuleysta waxaa deyntooda guriga 'mortgages' hal sano bixinta doonta OnPoint, iyada dugsiyadooduna uu midkiiba heli doono \$2,500. Kuwa kale ee u soo baxa kaalinta kama dambeysta ah waxay heli doonaan \$5,000 oo hadiyad ah, iyo \$1,500 oo loogu talagalay dugsiyadooda.

Marka la joogo Wilson, Minato wuxuu mas'uul ka ahaa kobaca dhanka AP Physics I, oo aan lahayn fasallo markii uu yimid iyada oo ay hadda jiraan shan fasal. Wuxuu bilaabay "science salons" oo ardayda AP Physics ku xira ardayda fasallada hoose oo u baahan caawimaad, iyo sidoo kale naadiga cilmiga xidigiska 'astronomy club', wuxuuna martigeliyaa xafladaha xiddigaha isaga oo koorsooyin joogto u dhiga/bara macallimiinta ku jira qaybaha hore-ilaa-dhexe ee xirfadahooga shaqo.

"Mr. Minato wuxuu xiiso gelin karaa fasal ay dhallinyaradiisu caajis dareemayaan kana dhigaa meel shidan isaga oo adeegsanaya dhiirigelintiisa leh dareen xiisaha leh uu qabo, hal-abuurnimo, aqoon, naxariis iyo humor wada socda," ayay qortay Kathy Weeks, oo ah waalidka arday hore, taasi oo loogu talagalay bogga abaalmarinta. "Xataa marka la joogo wakhtiga qadada, fasalka Joe waxaa ka buuxa arday rabta waxyaabo dheeraad ah."

Marka la joogo Franklin, Ryan ayaa ka gudba xirfadaha farsamada isaga oo sidoo kale baraya xirfado dabacsan oo ardaydu ugu baahan doonaan goobta shaqada, sida isku-filnaanshaha, xallinta dhibaatooyinka, wax-bilaabida qofka, fikir hal-abuurka leh. Wuxuu si joogto ah u martiqadaa xirfadlayaasha dhanka ganacsiga si ay ula hadlaan ardaydiisa, isla markaana wuxuu dugsiga dabadii bixiyaa fasalka dib u helidda credit-ka si uu caawijo ardayda ay waxbarashadu ku adag tahay.